



@DATETIME:'MMMM dd, yyyy'@

@ADDRESSLINE:SA,1@

@ADDRESSLINE:SA,2@

@ADDRESSLINE:SA,3@

@ADDRESSLINE:SA,4@

Lambarka Xisabta: @ACCOUNTNUMBER@

Cinwaanka Adeegga: @ACCOUNT\_INFO:ServiceAddress,False@

Waxa aan halkan idinkugu soo gudbineynaa macluumaad muhim ah oo ku saabsan adeegga tubooyinka biyaha ee soo gala gurigiina. Tubooyinka soo gala gurigaaga waxa ay ka sameysan yihiin leedh ama looga shakisan yahay leedh. Waxaanu u qaadaneynaa inuu ka sameysan yahay leedh ilaa sidaas si ka duwan la cadeeyo. Haddii khadka tubooyinku ka sameysan yahay leedh, gurigaagu waxa uu ka soo baxay shuruudaha ku xiran in tubooyinka uu kaa bedelo Barnaamijka Heer Gobol ee Adeegga Biyaha ee St. Paul (SPRWS).

Barnaamijka SPRWS ee waa mid soconaya 10 sano oo loogu talo galay in lagu bedelo tubooyinka leedhka ka sameysan iyada oo aan wax kharash ah laga qaadin mulkiilayaasha guryaha. Gurigaaga waxa uu ka soo baxay shuruudaha bedelaadda ee lacag la'aanta ah ee 2026 xilliga dhismaha. Waxa aan si adag idinkugu dhiiri gelinayaa in aad ka faa'iideysataan fursadaas adinka oo maanta barta internetka ka buuxiya foomka!

Waxaa naga go'an in aan leedhka ka saarno adeegga tubooyinka waayo cabitaanka biyo leedh ku jiro waxa ay khatar caafimaad ku keeni kartaa habdhiska dheefshiidka. Si looga hortago khatarta ka dhalan karta leedhka, waxaa muhim ah in aan meesha ka saarno tubooyinka biyaha iyo tubooyinka gudaha ee guriga.

Fadlan u fiirso in adeegga lacag la'aanta ah ee bedelidda tubooyinka waa mid ku xiran sida dhaqaale loo helo. Haddii aad doorato in aad diido in tubooyinka la bedelo, fadlan buuxi foomka aad sidaas ku cadeyneeyso. SPRWS waxaa ka go'an xoojinta nidaamka biyaha waxaana la bedelayaa tubooyinka biyaha ee leedhka ka sameysan ee dibadda ka soo gala guriga.

***Si aad uga qeyb qaadato bedelidda adeegga tubooyinka, fadlan buuxi foomka doonistaada ee barta internetka maanta [stpaul.gov/ServiceMaterialMap](http://stpaul.gov/ServiceMaterialMap)***



## Waa In Aad Talaabo Qaadaa



Tubooyinka soo gala gurigaaga waxaa looga shakisan yahay in ay ka samaysan yihiin **LEEDH**



**HALKAN** iska diiwaangeli si laguugu bedelo khadka tubooyinka **LACAG LA'AAN**

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan leedhka iyo biyaha guriga laga cabo soo booqo **stpaul.gov/lead-free** ama si toos ah nagula soo xiriir telefoonka ama iimeyl wixii su'aalo ah ee aad qabto ee ku saabsan barnaamijka.

Para más información, póngase en contacto con el equipo de SPRWS "Libre de Plomo" en el 651-266-6820. Se le facilitará un traductor.

Kom paub cov ntaub ntau ntxiv, tiv tauj Lead Free SPRWS pab pawg ntawm 651-266-6820. Yuav muaj ib tus kws txhais lus rau koj.

Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir kooxda Lead Free SPRWS lambarka 651-266-6820. Turjumaan ayaa lagu heli doonaa.

### Nala soo xiriir



651-266-6820



lead@stpaul.gov

# Buuxi foomka aad ku cadeyneyso doonistaada!



## TALAABADA 1AAD

Soo booqo khariidadda adeegga bedelidda tubooyinka ee SPRWS .



[stpaul.gov/ServiceMaterialMap](http://stpaul.gov/ServiceMaterialMap)

## TALAABADA 2AAD

Akhri bogga soo dhaweynta oo guji "OK".



Sax ku calaamadee sanduuqa aad ku xaqijineyso in aad fahamtay macluumaadka

## TALAABADA 3AAD

Ku qor lambarka guriga halka baaritaanka cinwaanka loogu talo galay.



## TALAABADA 4AAD

Dooro guriga khadka cagaaran ku qoran.



## TALAABADA 5AAD

Guji cinwaanka soo gudbinta foomka gudbinta doonistaada "Submit an intent form" ee soo baxay.



## TALAABADA 6AAD

Buuxi oo soo dir foomka cadeynaya in aad dooneyso.



Goobaha la doonayo in aad buuxiso waxaa dul saaran xiddig\*